

Waad ku mahadsan tahay baarista biyahaaga cabitaanka. Waxyaabo dheeraad ah ka baro waxaadna daawataa muuqaalka ku saabsan baaritaanka biyaha aad cabto www.healthvermont.gov/water.



1. Diyaari

- Geli baakatka(yada) qaboojiyaha wakhti horeba.
- Qorshee inaad muunadaada soo qaado subaxda aad keento.
- Tag isha biyaha aad cabto ee aad doonayso inaad baarto.
- Ha taaban gudaha furka ama afka dhalada muunadda biyaha.
- Kusii daa biyaha qabow **si xooggan muddo 3-5 daqiiqo ah** si aad meesha uga saarto biyihii tuubada kusii jiray.
- Kusoo celi **socodka biyaha heer dhexe si aad usoo qaadato muunada biyaha.**

2. Soo qaad

- Buuxi dhalada muunada ilaa afka kuna xir furka si adag si aysan biyuhu u daadan.
- Buuxi **Foomka Macluumaadka Soo qaadista Muunada Biyaha**, oo ay ku jiraan taariikhda iyo wakhtiga aad soo qaadday muunadaada biyaha.
- Haddii aad adeegsato **daaweyn biyo**, ku faahfaahi foomka (tusaale: biyo jilciye).

- Calaamadee dhalada muunada si loo waafajiyo qaabka saxda ah (tusaale ahaan: John Smith, sinxiga kijada).

3. Kusoo celi

- Gali **baakadaha qaboojiyaha** dhalada muunadda oo si adag loo daboolay bacda caag ah ama kulayl nuuge gacanta lagu siiyay.
- Geli bacda caaga ah ama gacanta kulayl nuugaha bogoska asaga oo leh:
 - **Foomka Qaadista Macluumaadka Muunada Biyaha ah** oo dhammaystiran. Waxaanu ku talinaynaa inaad foomka dhex galiso bac caag ah oo daboolan, si aysan u qoyin.
- Si aad muunadaada usoo gaarsiiso Waaxda Shaybaarka Caafimaadka si loo baaro muddo **48 saacadood ah**, waxaad samaysaa midkood:
 - **Keen Shaybaarka**: 359 South Park Drive, Colchester, Vermont (Isniinta ilaa Jimcaha, 7:45 subaxnimo.- 4:30 galabnimo.)
 - **Dhig Xaafiiska Degmada**: Arag gelinta wadata cinwaankada iyo wakhtiyada dhigida. Muunadaha waxaa kaliya la aqbalayaa maalmaha **Isniinta – Khamiista** xiliyada ugu badan ee la keenayana waa xiliga duhuradii ah. Biyahaaga waa inaad muunadda kasoo qaaddaa isla maalinka aad keenayso.
 - **Xiliyada danbe ee habeenkii ee USPS**: PO Box 1125, Burlington, VT 05402-1125. **Ha ku soo dirin boostada maalmaha Jimcaha ama Khamiista.**

Su'aalaha Badanaa La Isweydiyo

Sidee ayaan ku xaqiijin karaa inaan soo diro muunad la aqbalayo si loo baaro?

Mararka qaarkood waxaanu helnaa muunado u baahan inay noqdaan kuwo “u qalma,” taasoo micnaheedu yahay in muunaddu aanay buuxin dhammaanba shuruudihii baaritaanka. Halkan waxaa ku jira dhowr shay oo aad samayn karto si aad usoo gudbiso muunada biyaha cabitaanka ee la aqbali karo:

- Kusoo gudbi muunaddaada biyaha dhalada uu shaybaarku kusiiyay.
- Hasoo dirin muunad leh ur koloriin oo xooggan – koloriinta faraha badan waxay saamayn ku yeelan kartaa qaar kamid ah baaritaanada.
- Xaqiiji inaad si **buuxda usoo buuxiso Foomka Macluumaadka Soo qaadista Muunadda Biyaha.**
- xaqiiji in muunadu **48 saacadood gudahood kusoo gaarto shaybaarka** laga bilaabo wakhtigii aad buuxisay dhalada muunadaada biyaha.
- **Isticmaal baakatyada qaboojiyaha ah iyo qaboojiye** si aad heerkulka muunaddaada biyaha uga dhigto mid ka hooseysa 42 digrii F (6° Celsius) – qabow, laakiin aan baraf ahayn – ilaa ay ka gaarayso shaybaarka.

Goorma ayaan filii karaa natiijada baaritaankayga?

Natiijooyinka baaritaanka waxaa boostada laguugu soo diri doonaa ilaa 7 maalmood oo shaqo gudahood ka dib marka muunadda biyaha la helo.

Halkee ayaan ka heli karaa macluumaad ku saabsan saamaynta caafimaad ee ka dhasha wasakhda ku jirta biyahayga cabitaanka?

Wixii macluumaad dheeraad ah, iyo si aad u daawato muuqaal ku saabsan sida loo baaro biyaha baaritaanka, booqo healthvermont.gov/water.